
# Guida pratica per i richiedenti protezione internazionale






SPRAR

Sistema di Protezione
per Richiedenti Asilo e Rifugiati

anci

Dipartimento per le libertà civili
e l'immigrazione

Commissione Nazionale
per il Diritto d'Asilo

# Tusmo


Halkaaad Joogto – Khariidada Talyaaniga

Kuma ayaa ah ilaalin-doon caalami ah?

Waxaad soo gashay midowga yurub

Khariiidada Midowga Yurub

Helista hanaanka codsashada ilaainta caalamiga ah

Wajiyada codsiga ilaalinta caalamiga ah

- Soo gudbinta codsiga ilaalinta caalamiga ah (Wajiga I)
- Dhagaysiga dacwada (Wajiga II)
- Waxaa lagugu martigelinayaa xarun dawladeed

Xuquuqdaada Xarunta magan galydo doonka

Xuquuqdaada ilaalo doon caalami ahaan

Go’aanada laga yaabo in gudida xuduudu gaadho (Wajiga III):

- Haddii qaxootinimo laguu aqoonsado
- Haddii lagu siiyey ilaalin kabis ah
- Haddii aad tahay qof haysta joogis sababo la xidhiidha bani-aadminimo awgood

U wareegid ambiil qaadasho (Wajiga IV)

Burinta iyo joojinta ilaalinta caalamiga ah


Ku noqoshadda wadankaagii ee tabaruca ah

Macnaha Erayadda

Ciwaano faa’iido badan leh


SOMALO

## HALKA AAD JOOGTO – KHARIIDADA TALYAANIGA




SOMALO

## KUMA AYAA AH ILAALIN-DOON CAALAMI AH?

Ilaalin-doonka caalamiga ahi waa shaqsi codsaday ilaalin caalami ah oo sugaya go'aanka u aqoonsashada qaxooti ahaan ama nooc kale oo ilaalin ah. Talyaaniga, dhamaan muhaajiriinta oo dhan waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan ilaalin caalami ah.

### QAXOOTI WAXAA AH

Qof ka cabsanaya in lagu cadaadiyo dalka uu dhashay ama ay u dhalatay, ama haddii aanu muwaadin ku ahayn wadanka uu dagan yahay, sababahan awgeed u cabsanaya:

- **isir** (tusaale ahaan, midabka awgii ama ka mid ahaanshaha qoomiyad gaar ah, qabiil/bulsho ama dad laga tiro badan yahay);
- **diin** (tusaale ahaan, rumaysnaanta ama rumayn la'aanta diin gaar ah, ama ka mid ahaanshaha koox diimeed oo gaar ah awgeed);
- **dhalasho** (tusaale ahaan, xubin ka ahaanshaha koox luuqadeed ama qoomiyad laga tiro badan yahay);
- **xubinimada koox bulsho gaar ah** (koox dad ah oo wadaaga astaamo guud ama la og yahay inay yihiin koox bulshada ka tirsan oo ka duulaysa, tusaale ahaan, jinsi ama lab/dhedig, galmo sooc, qoys, dhaqan, waxbarasho, ama mihnad);
- **aragti siyaasadeed** (tusaale ahaan, qabista aragti siyaasadeed, hawlo siyaasadeed, lahaanshaha aragti siyaasadeed, ama mucaarid adag);

Oo aan diyaar u ahayn ama aan awoodin inuu ilaain ka helo dawlada wadankiisa ama wadankeeda ay ka soo jeedo ama wadanka uu/ay sida rasmiga u degan yahay/tahay.

Cadaadiska waxaa loo yaqaan, tusaale ahaan, cago-juglayn nolosha ah, si qaldan uga qaadid xoriyadda shaqsiga ah, ama xad-gudub daran oo xaquuqda aadamiga ka dhan ah. Khasab maaha inaad hore u ahayd dhibane cadaadis dhab ah si laguu siiyo aqoonsi qaxootinimo.
Qof waxaa laga yaabaa in lagu siiyo aqoonsi qaxootinimo jiritaanka sababo cad oo uu uga baqdo halis ba'an oo ah cadaadis haddii dib loo mustaafirayo.

Qeexitaanka ereyga " qaxooti" waa qodobka 1-aad ee Heshiiskii Geneva ee 1951-kii kaas oo ku sahabsanaa qaxootinimada, kaas oo marka la tixraaco qaxooti ku sheegayay qof qaba *"sabab cad oo uu uga cabsado cadaadis la xidhiidha sababo isirnimo, diin, dhalasho, aragti siyaasadeed, ama ka mid ahaanshaha koox bulsho oo gaar ah, ka baxsan wadanka uu u dhashay ama ay u dhalatay oo aan awoodin ama diyaar u ahayn, cabsidan awgeed, inuu ka faa'iidaysto ilaalinta dawlada wadankaa; ama kaas oo, aan lahayn dhalasho oo ka baxsan wadankii uu hore u degana arimahan awgeed, aan awoodin ama aan diyaar u ahayn, cabsidan awgeed, inuu wadankii ku noqdo*"

SOMALO

Guud ahaan , mushkiladaha dhaqaale, inkasta oo ay haboon dhab yihiin xaaladaha qaarkoodna daran yihiin, ma noqdaan sababo qofka lagu siiyo aqoonsi qaxootinimo

**ILAALINTA KABISTA AHI** Waa ilaalinta la siiyo muwaadinka aan ka tirsanayn Midowga Yurub, ama qofka aan wadan lahayn ee aan lahayn shuruudaha loogu aqoonsanayo qaxootinimo, laakiin ay jiraan waxyaabo la tixgaliyo taas oo haddii uu ama ay ku noqoto wadankeedii/kiisii, ama wadankii deganaanshaha rasmiga ah, keeni karta halis waxyeelo, oo aan karin ama aan doonayn, halistan awgeed, inuu ka faa'iidaysto ilaalinta wadanka la soo sheegay.

**XARUMAHA BOOLIISKA ILAALINTA AADMINIMO** waxaa laga yaabaa inay soo saaraan ogolaansho joogis sababo la xidhiidha aadminimo mar kasta oo Gudida Xuduuduhu, marka aanay aqoonsanayn dhinacada ilaalinta caalamiga ah, ay tilmaamaan "sababo halis ah oo aadminimo" oo ku sahabsan qofka magan-galyo doonka ah.

**Dhowrsanaanta**

Macluumaadka aad siin doonto dadka ku lugta leh hanaanka lafo-gurka codsiga ilaalinta caalamiga ah lagama yaabo in loo sheego ama loo gudbiyo masuuliyiinta Wadanka aad ka soo jeedo.

SOMALO

## WAXAAD SOO GASHAY MIDOWGA YURUB

Waxaad ku sugan tahay Talyaaniga, taa macnaheedu waxaa weeyi inaad soo gashay Wadan Xubin ka ah Midowga Yurub.

Sida uu sheegayo sharciga Yurub **(Sharcigii II ee Dublin)** si xor ah uma go'aansan kartid wadanka aad ka codsanayso ilaalinta, inkastoo ay furan tahay inaad eegto codsigaaga, tusaale ahaan:

- Wadankii u horeeyay ee bilaa ogolaanshaha aad ku soo gashay;
- Wadankii ku siiyay **ogolaanshaha joogista ama fiisaha galista**;
- Wadanka ay **ehelkaagu degan yihiin**, haddii aad tahay ilm yar oo aan loo soo raacin Talyaaniga.
- Wadanka **qaraabadaadu** ay dagan yihiin kuwaas oo loo aqoonsaday qaxooti ama kuwaas oo codsaday magan-galyo.

**Qaraabo** waxaa loo yaqaan:

- Saygaaga ama xaaskaaga;
- qofka aad la leedahay xidhiidh degan, haddii wadanka martigeliyuhu uu u tixgaliyo
- inay u dhiganto guur;
- caruurtaada yaryar, ilaa inta aad dhaqaale ahaan taageerto ee aan guursan;
- aabahaa, hooyadaa ama ilaaliyahaaga haddii aad tahay ilmo oo aanad guursan.

Xaaladaha kor lagu soo xusay waa kuwa ugu badan, waxaa jira shuruudo kale oo lagu go'aaminayo kartida. Haddii shiki yimaad oo aad u baahan tahay macluumaad dheeri ah, fadlan la xidhiidh shaqaalaha xarunta.

SOMALO

Go'aaminta kartida  Talyaaniga ee lafo-gurka codsiga ilaalinta caalamiga booliisku ku samayn maayo xarunta. Booliisku wuxuu dhamaan waraaqaha u diri doonaa xafiiska haboon ee Wasaaradda Arimaha Gudaha ee Rome (loona yaqaan "laanta Dublin"), kaas oo samayn doona go'aanka ku salaysan xogta uu heli karo. Waxaa si kastaba ha ahaatee muhim ah, go'aanka haboon dartii, in la bixiyo dhamaan macluumaadka lagama maarmaanka ah. Xasuusnow inaad xaq u leedahay inaad ogaato dhamaan xogta loo gudbiyey " laanta Dublin" oo, haddii xogtu khaldan tahay, aad sixi kartid.
Inta lagu gudo jiro hanaanka lagu ogaanayo bal in Talyaanigu karti u leeyahay baadhista codsiga magan-galyo doonka, meeqaankaaga aad ku joogto gudaha Talyaanigu waa magan-galyo doon.

Haddiiba go'aan tilmaamaya in Wadanka ay tahay inuu qiimeeyo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah, waxaa laga yaabaa inaad ambiil ku qaadato 60 maalmood gudahooda oo

ka bilaabmaa marka go'aanka Laanta Dublin ku soo gaadho
Sharcigu wuxuu sheegayaa inaad raadsan karto taageerada garyaqaan. Haddii aanad awoodin inaad iska bixiso lacagta garyaqaanka, waxad codsan kartaa taageero sharci oo bilaash ah (taas oo ay dawladdu maalgaliso).

## KHARIIDADA MIDOWGA YURUB




© European Community, 1995-2007

Wadamada xubinta ka ah Midowga Yurub: Austria, Belgium, Bulgaria, Cyprus, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Ireland, Italy, Latvia, Lithuania, Luxemburg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, United Kingdom, Czech Republic, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden, Hungary.

## HELISTA HANAANKA CODSASHADA ILAALINTA CAALAMIGA AH

Codsiga ilaalinta caalamiga ahi waa shaqsi waana in loo dhiibaa:

- Booliiska Xuduuda, waqtiga la yimaad Talyaaniga;
- Waaxda Booliiska ee Xafiiska Socdaalka, haddii Talyaaniga aad hore u joogtay.

Waxaa laguu ogol yahay inaad baaqi ku ahaato xuduuda wadanka ilaa la helayo go'aanka Gudida Xuduuda ee ku sahabsan codsigaaga ilaalinta caalamiga ah.

**XASUUSNOW:** SARKAAL SARE AYAA GO'AAMIN DOONA MEESHA AAD JOOGAYSO ILAA NIDAAMKA BAADHISTA EE CODSIGA ILAALINTA CAALAMIGA AH LA SOO GABO-GABEYNAYO.

Codsigaaga ilaalinta caalamiga ah lama diidi karo ama lama reebi karo iyaddoo lala daahay awgeed. Ma jiro waqti kama dambays ah oo loo qabto soo gudbinta codsiga.

Suurtogalnimada lagula xidhiidhayo UNHCR iyo ururada aasaasiga ah ee ilaalinta dadka codsanaya ilaalinta caalamiga ah waa la damaanad qaaday waji kasta oo u marayo hanaanku.

Marka lagu casuumo, waa inaad si shaqsi ah uga hor muuqataa Gudida Xuduuda.
Waa inaad keentaa baasaaboorkaaga iyo dhamaan dokumentiyadda la xidhiidha codsiga.

**XASUUSNOW** INAAD BOOLIISKA OGAYSIISO MAR KASTA OO AAD BADASHO DEGAANKAAGA; HADDII KALE, WAX KASTA OO LAGUU SHEEGI LAHAA ADIGA WAXAA LOO TIXGALINAYAA IN SI ANSAX KU SOO GAADHAY CIWAANKII U DAMBEEYAY EE DAGANAYD XATAA HADDII AANAD FARIINTA HELIN.

SOMALO

Gudida Xuduudaha ayaa qabanaysa dhagaysiga dacwadaada; fariimaha waxaa laguu soo diri doonaa iyaddoo laguu soo marinayo Waaxda Booliiska.

Waxaa suurtogal ah in dib loo dhigo waraysiga shaqsiga marka aanad iman karin sababo caafimaad awgeed. Sababaha daran ee caafimaad ee aan kuu ogolaan karin inaad timaad waraysiga waa inuu cadeeyaa dhaqtar.

**XASUUSNOW**

- KIIS KASTA, GUDIDU WAXAY GO'AAN KU GAADHI DOONTAA DOKUMANTIYADA AY HELI KARTO HADDII SI JOOGTO AH LAGUU OGAYSIIYO, HADDII AANAD IMAN WARAYSIGA, OO AANAD KEENIN CADAYNTA DIB U DHIGISTA WARAYSIGA.

- HADDII, SI KASTABA HA AHAATEE, AAN LAGU OGAYSIIN DHAGAYSIGA GUDIDA, OO GUDIDU AANAY GO'AAN KA GAADHIN CODSIGAAGA ILAALINTA CAALAMIGA AH, WAXAA LAGA YAABAA INAAD BALLAN CUSUB LAGUU QABAN DOONO HAL MAR OO KALIYA KAAS OO NOQON DOONA 10 MAALMOOD GUDAHOOD OO KA BILAABMAYSA MARKA DURUUFUHU DHAMAADAAN TAAS OO LAGUU OGOLAAN WAAYO INAAD KA QAYB-GASHO WARAYSIGA.

Tani waxay ku salaysan tahay qaab-dhismeedka wajiyadda ilaalinta caalamiga ah.

SOMALO

## WAJIYADA CODSIGA ILAALINTA CAALAMIGA AH

## SOO GUDBINTA CODSIGA ILAALINTA CAALAMIGA AH (WAJIGA I)

Codsiga ilaalinta caalamiga ahi waa in shaqsi ahaan loogu soo gudbiyaa:
Booliiska Xuduuda, marka Talyaaniga la yimaad;
Waaxda Booliiska –Xafiiska Socdaalka Booliiska, haddii aad hore u joogtay Talyaaniga.

**XASUUSNOW:** haddii aad tahay waalid, codsigaaga waxaa ka mid ah caruurta yaryar ee aan guursan ee ku sugan xuduudka Talyaaniga.

Haddii aad Talyaaniga soo gasho adiga oo aan sidan fiisaha galista, oo sidaa darteed aad bilaa ogolaansho tahay, sharciga Talyaaniga ayaa ku siinaya **hab aqoonsi,** kaas oo uu fulin doono booliisku; tan macnaheedu waxa weeyi in lagu aqoonsado ka hor inta aan codsiga la gudbin.

Iyaddo tan la eegayo, waxaa lagu ogaysiin doonaa taariikhda balanka ee xafiiska booliiska. Inta lagu gudo jiro kulankan, sarkaal booliis ayaa joogi doona – haddii lagama maarmaan ay noqoto – turjumaan luuqadaada koowaad ku hadla ama luuqadda kale ee aad ku hadli karto ah ayaa joogi doona.

Booliisku wuxuu qaadi doonaa sawirkaaga iyo farahaaga ("*Fotosegnalamento*"= waa hab lagu cadeeyo aqoosiga ama baaddi-sooca)

Kadib waxaad yeelan doontaa ballan aad ku rasmiyaynayso codsigaaga, kaas oo inta lagu guddo jiro "Foomka rasmiga ee aqoonsiga qaxootinimada, sida ku cadd Heshiiska Geneva" (Foomka rasmiga ah C/3) ayaa la buuxin doonaa. Su'aaluhu waxay ku sahabsanaan doonaan xogtaada shaqsiga (magaca, magaca qoyska ee seyga/xaaska, meesha dhalashada, dhalashadda) iyo qaraabadda (magaca iyo magaca qoyska ee waalidiinta, magaca iyo magaca qoyska ee seyga/xaaska, magaca iyo magaca qoyska ee caruurta, meesha ay caruurtaadu ku nool yihiin); intaa waxaa dheer oo lagu waydiin doonaa:

- in aad sharaxdo marrinka aad kaga timid wadankaagii ee aad ku timid Talyaaniga (tusaale ahaan waqtiga soo amba-baxa, inta uu socdaalku qaatay, gaadiidka la isticmaalay);
- inaad si kooban u sheegto sababaha aad uga timid wadankii;
- inaad si kooban u qorto sababahan : waxaad ku soo qori kartaa afkaaga hooyo ama luuqada kale ee aad garanayso kuna sharixi karto naftaada.

**XASUUSNOW:** si aan u ogaysiino hawl-wadeenada ama booliiska haddii dhib kaa haysato qoraalka iyo akhriska

**Booliiska ayaa hayn doona foomka rasmiga ah ee C/3 waxaana lagu siin doonaa koobi.**

Dhamaan macluumaadka la bixiyey intii lagu gudo jiray waraysiga booliisku way xafidan tahay:
- Looma gudbin karo masuuliyiinta wadankaaga;
- Looma gudbin karo dadka kale ee xarunta ama ka baxsan xarunta.

**Waxaa laga yaabaa inaad ku dari karto bog qoraal foomka rasmiga ah ee C/3 kaas oo ka hadlaya sheekadaada shaqsiga. Khasab maaha inaad af Talyaani ku qorto; waxaad ku qori kartaa afkaaga hooyo.**

Booliiska ayaa ku waydiin doona inaad dokumentiyo haysato iyo in kale (tusaale ahaan kaadhka aqoonsiga, baasaaboor, LAP (ogolaansho galiseed oo gaar ah), kaadhka xubinimada xisbiga, shahaadooyinka). Haddii aanad haysan dokumentiyo, uu ka mid yahay baasaaboor, gacanta ka gali booliiska iyagaa koobiyo ka samayn doona.
Booliiska ayaa hayn doona orijinalka oo ku siin doona koobi shaambadaysan ("diiwaanka soo celinta").

**Codsiga martigelinta**
Haddii aanay jirin hab aad u noolaato oo aanad ku jirin xarun martigelin dawladeed, waxaa laga yaabaa inaad codsato in Waaxda Booliisku la xidhiidho Aaga martigalinta ee ka tirsan mid ka mid ah xarumaha ay ku siiyeen hay'addaha maxalliga ah ee Sistamka Ilaalinta magan-galyo doonka iyo qaxootiga (SPRAR).



**XASUUSNOW**
- Xiliga codsiga, sarkaalka booliiska ayaa ku ogaysiin doona nidaamka aad raacayso, xuquuqdaada iyo waajibaadka inta lagu gudo jiro hanaanka, iyo waqtiga iyo hababka aad u taageeri karto codsigaaga;
- Marka xarumaha booliisku ay helaan codsiga ilaalinta, waxay qabyaynayaan warbixin ku sahabsan hadalkaaga waxaanay ku daraysaa qoraal. Marka aad ansixiso ee aad saxeexdo warbixintan, koobi ayaa lagu siin doonaa taas oo uu soo raaco dokumantiyada lagu daray;
- Gudida xuduudaha ayaa go'aamin karta in aanay ku waraysan adiga haddii ay kuu tixgaliso inay jiraan sababo ku filan in lagu aqoonsado qaxootinimo; taa waxaa soo raaca, gudidu waxaa laga yaabaa inay go'aamiso in aanay ku waraysan ama inay dib u dhigto waraysiga haddii aanad ku jirin meeqaan aad ka muuqato;
- Haddii aanad iman waraysiga, adigoo oo aan codsan dib u dhigis, go'aanka gudidu wuxuu ku salaysnaan doonaa dokumentiyada aad keento;

- Macluumaadka aad siiso masuuliyiintu iyo hawl wadeenada ku lugta leh hanaanka baadhista codsiga ilaalinta caalamiga ahi looma sheegi doono ama looma gudbin doono masuuliyiinta wadanka aad ka timid;
- Waa muhim inaad si buuxda u sharaxdo oo aad u qorto sababaha aad wadanka uga tagayso;
- Haddii dhib ka haysato sharaxaada qoraalka, haddii aanad xasuusan karin, haddii aad dareento daal ama niyadjab marka aad xasuusanayso ee aad sharaxayso, ama haddii aad u baahan tahay waqti dheeri ah oo aad ku sharaxayso, fadlan sheeg arimahan marka aad ku gudo jirto waraysiga;
- Haddii aanad haysan waqti aad ku sharaxdo ama/iyo ku qorayso dhamaan sababaha aad uga baxsatay wadankaaga, fadlan sheeg ta ugu haboon oo tilmaam in aanay dhamays tirnayn;
- Haddii aanad awoodin inaad sharaxdo dhamaan sababaha aad wadankaagii uga baxsatay, qor hadal dheeraad kadib marka aad la kulanto booliiska oo u celi marka ay dhamaystiran tahay;
- Haddii aad u baahan tahay sharaxaad ama aad qabto shaki ku sahabsan wixi la yidhi intii lagu gudo jiray kulankii booliiska ama turjumaanka, haddii aad u baahan tahay caawimo ku sahabsan sida  wax loo qoro ama wax loo xasuusto, u sheeg wakiilka sharciga ah ee xarunta;

Had iyo goor xasuuso inaad haysato koobiyo ka mid ah dokumentiyada aad keento booliiska.Dhamaan xidhiidhka wada hadal ee ku sahabsan codsiga magan-galyo doonka (tusaale ahaan, dhagaysiga dacwada booliiska ama gudida, codsiga dokumentiyada, u badalashada wadan kale, go’aanka gudida) waxaa lagu fulin doonaa afkaaga hooyo, haddii aanay suurtogal ahayna, waxaa lagu fulin doonaa Ingiriisi, Faransiis, Isbaanish, ama Carabi, iyaddo la tixraacayo dookha aa tilmaantay.

SOMALO

## DHAGAYSIGA DACWADDA (WAJIGA II)

Go’aanka ku sahabsan codsiga ilaalinta caalamiga waa hawl ay fulinayaan hay’add **guddida xuduuda ee aqoonsiga ilaalinta caalamiga,** oo ka samaysan 4 xubnood**:**
2 xubnood oo ka socda wasaaradda Arimaha Gudaha
1 wakiil oo ka socda dawladda hoose ( ama gobolka)
1 wakiil oo ka socda UNHCR

Sharcigu wuxuu sheegaya in casuumadda dhagaysiga Guddida dacwadda (ama waraysiga) waa in booliiska loogu sheegaa qoraal ahaan.
Waxaa jiri doona turjumaan dacwadda kaas oo ku hadlayaa luuqadaada oo turjumaya waxa la leeyahay

Waxaad codsan kartaa dib u dhigis dacwadda sababo caafimaad awgood, taas oo ay tahay in la cadeeyo, ama sababo kale oo halis ah.
Waxaad codsan kartaa inaad waraysiga xubin kaliya oo ka tirsan Guddida oo jinsigaaga ah. waa inaad ogaysiisaa hawlwadeenada xarunta.

Dhagaysiga dacwaddu wuxuu ku dhici doonaa **30 maalmood** gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta codsiga la soo gudbiyo iyaddoo guddiduna ay go'aanka samayn doonto saddexda maalmood ee xigga.

**XASUUSNOW:**

- Codsigaaga waxaa loo gudbinayaa **baadhis mudnaan leh** marka xaaladaada loo tixgaliyo mid nugul.
- Guddidu waxay ku dhawaaqayaan **galis la'aan** codsigaaga baadhistuna ma sii soconayso haddii laguu aqoonsado qaxooti ama haddii mar hore aad heshay diidmo oo aad mar kale codsi soo samayso adigoo aan keenin xaqiiqooyin ama dhacdooyin cusub.

Guddida ayaa go'aamin karta inay laasho dhagaysiga shaqsiga ama inay dib u dhigto marka:

- Ay u baahan tahay waqti dheeraad ah ama dokumentiyo kale si ay go'aan u gaadho;
- Aanad awoodin inaad ka soo qaybgashid dhagaysiga dacwadda;
- Ay jiraan dhibaatooyin is fahan la'aan ah oo xaga xidhiidhka ah

Guddida ayaa ku waydiin doona:

- Xogtaada shaqsiga ah iyo tan qoyskaaga,
- Socdaalka
- Sababaha aad aad uga timid wadankaagii hooyo.
- Sababaha aanad u doonayn ama aanad ugu noqon karin wadankaagii hooyo.

SOMALO

**XUSUUSNOW IN:**

❑ Haddii aa tahay ilmo yar, dhagaysiga dacwadda ee gudida horteeda ay ka dhici doonto iyaddoo uu joogo mid ka mid ah waalidkaaga ama ilaaliyayaashaada;
❑ Guddida horteeda, waxaad xaq u leedahay inaad isku sharaxdo afkaaga hooyo;
❑ Haddii aad qabto dhibaato xaga la xidhiidhka turjumaanka, fadlan ogaysii guddida;
❑ Xogta aad bixisid inta lagu gudo jiro aad ayuu u dhowsoon tahay;
❑ Sharciga wuxuu sheegayaa inta lagu gudo jiro dhagaysiga in garyaqaan ku caawin doono.Si aad ula xidhiidho garyaqaan ama aad ula kulanto ka hor dhagaysiga dacwadda, waxaad la xidhiidhaa hawlwadeenka sharciga ee xarunta;
❑ Waxaad sidoo kale dokumentiyo iyo baaq u diri kartaa Guddida ka hor dhagaysiga;
❑ Waxaa muhiim ah inaad sheekadaad u sheegto hab gun iyo baar ah oo faahfaahsan;

- Haddii aad dhib ku qabto sharaxaada, haddii aanad si fiican u wax u xasuusan ama ay dhibaato kaa haysato, ama aad dareemayso xanuun marka aad wax xasuusanayso ama sharaxayso, sheeg inta dacwadda lagu jiro;
- Waxaa kuu fiican inaad Gudida ogaysiiso haddii aad qabto dhibaato jidheed ama nafsiyeed, oo aad u baahnayd, waxaa laga yaabaa in shaqaalaha taageeradda ee xaruntu ku taageeraan;
- Waxaa aad tidhaahdo inta dacwaddu socoto waxaa lagu qori doonaa waraaq (diiwaan), kaas oo aad saxeexi doontid, kaas oo laguu soo saari doona adiga dhamaadka dacwadda. **Codso turjumaad wixii la qoray ka hor inta aanad saxeexin**, si aad u hubsato in wixii aad sheegtay oo sax ah la qoray. Haddii aad diido inaad saxeexdo diiwaanka, sababaha aad u diido waa la sheegi doonaa. Diidistu Guddida uma diidayso inay go'aan ka gaadhaan codsigaaga aqoonsiga ilaalinta caalamiga ah.

**Gaar ahaan, haddii aad tahay ilmo yar oo ku sugan gudahaTalyaaniga:**
- Guddidu waxay dacwadda dhagaystaan oo kaliya marka ilaaliye ama waalid joogo;
- Guddidu **waxay go'aan ku gaadhi karaan in aanay kuugu yeedhin dacwada** haddii ay gaadhaan **go'aan fiican** oo ku salaysan dokumentiyadaada aad keentay iyo weedhaha aad booliiska siisay.

## WAXAA LAGUGU MARTIGALINAYA XARUN DAWLADEED

Waxaa lagugu martigalin doonaa xarunta dawladeedka ee magan galyo doonka ilaalin doonka caalamiga ah:

**1 - Haddii aad codsatay kadib markii lagu joojiyey sabab la xidhiidha adigoo ka leexdayaama isku dayay inaad ka leexato kaantaroolka xadka, ama waxyar uun kadib;**

**2 - Haddii aad codsatay markii lagu joojiyey adigoo ku jira degaan aan laguu ogolayn;**

**Sida uu sheegayo sharciga Talyaanigu, ka tagista xarunta martigalinta ogolaansho la'aan la mid maaha inaad ka noqotay codsigii magan galyo doonka, laakiin gudida xuduuda ayaa go'aaminaysa, wixii khuseeya codsiga ilaalinta caalamiga ah, kaas oo ku salaysan akhbaarta ay hayaan.**

Had iy goor waydii hawl wadeenka sharciga ee xarunta marka aad codsanayso inaad xarunta ka tagto, wax kasta oo aad doonayso inaad samayso, iyo wixii macluumaad dheeri ah.

SOMALO

Sharcigu wuxuu ogolyahay, kiiska 1 iyo 2, in xarunta lagugu hayn doono muddo aan ka badnayn **35 maalmood** oo ka bilaabmaysa xilliga aad codsato magan galyo doonka.

**AMA**

**3 - Marka ay lagama maarmaan noqoto in la cadeeyo ama la go'aamiyo cidaadda ama dhalashadaada haddii aanad sidan aqoonsi ama aqoonsi socdaal, ama haddii aad keentay dokumentiyo la been abuuray;**

**XASUUSNOW** Xaaladan waxaa lagu dajin doonaa xarunta muddo lagama maarmaan u ah fulinta sharciga, muddo, kiis walba aan ka dheerayn 20 maalmood.

**Sida uu sheegayo sharciga Talyaanigu, ka tagista xarunta martigalinta ogolaansho la'aan la mid maaha inaad ka noqotay codsigii magan galyo doonka, laakiin gudida xuduuda ayaa go'aaminaysa, wixii khuseeya codsiga ilaalinta caalamiga ah, kaas oo ku salaysan akhbaarta ay hayaan.**

Had iy goor waydii hawl wadeenka sharciga ee xarunta marka aad codsanayso inaad xarunta ka tagto, wax kasta oo aad doonayso inaad samayso, iyo wixii macluumaad dheeri ah.

***KA TAGISTA XARUNTA.*** *Sharcigu wuxuu ogol yahay inaad xarunta ka tagi kartid maalintii; intaa waxaa dheer, waxaa laga yaabaa inaad ka codsato hor-joogaha ogolaansho ku meelgaadh oo dhowr goor oo kala duwan aad ku baxayso. Marka ay jirto xaaladd caafimaad oo halis ah, mid qoys; ama la xidhiidha arimaha khuseeya codsiga ilaalinta caalamiga ah, waxaa laga yaabaa inaad hesho ogolaansho aad waqti dheer ku maqnaato.*

SOMALO

Haddii shaki qabto, oo aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, akhri xeerka xarunta oo la hadal hawlwadeen.

**GUUD AHAAN:**

Xaaladaha lagu sheegay qodobada 1, 2, iyo 3, taliyaha booliiska, marka uu helo codsigaaga ilaalinta calaamiga ah, ayaa kuu diyaarin doona in laguu ilaalin ilaalo doonka ilaalin caalami ah, oo ku samayn doona shahaado, taas oo cadaynaysa inaad tahay ilaalo doono caalami ah. Xusuusnow tan macnaheedu maaha ogolaansho joogis.
Marka xilliga martigalintu dhamaado, ogolaansho ku meelgaadh ah oo joogis ah ayaa laguu samayn doonaa, kaas oo ansax ah saddex bilood, la cusboonaysiin karo ilaa go'aan laga gaadhayo codsigaaga, laakiin aan lagu shaqo tagi karin.

Marka waqtiga martigalintu dhamado, ee aad hesho ogolaanshaha u joogitaanka ilaalin caalami ah, waa inaa xarunta ka tagtaa oo aad gashaa waddanka Talyaaniga. Marka arrintu sidan tahay, had iyo goor xusuunow inaad xarumaha booliiska u sheegto dhaqdhaqaaqaaga, adigoo ogaysiinaya iyaga halka aad doonayso inaad ku noolaato. Tanni waxay lagama maarmaan u tahay helitaanka fariimaha iyo yeedhista guddida. Si aad macluumaad u hesho, marka aad xarunta ka tagto, taas oo ku sahabsan martigalin dheeraad ah la xidhiidh hawlwadeenadda.
Haddii aan go'aan ku sahabsan kiiskaaga aan la gaadhin, 6 bilood kadib xilliga codsiga ilaalinta caalamiga ah, waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo ogolaansho joogiseed oo ansax ah 6 bilood, kaas oo awood kuu siinaya inaad si joogto ah u shaqayso ilaa kiiskaaga go'aan laga gaadhayo.
Haddii aad go'aansato inaad la noqoto codsigaagii ka hor dhagaysiga Guddida, la noqoshaddaa waxaa loo sheegi doonaa Guddida Xuduudka.

**XASUUSNOW** inta aad sugayso go'aanka, sida uu sheegayo sharciga Yurub, kama tagi kartid Talyaaniga. Haddii aad u guurto wadan reer Yurub ah, waxaad halis ugu jirtaa inaad si sharci darro ah ugu noolaato.
Haddii aad tagto wadan kale oo Yurub ah oo aad magan galyo u doonato, waxaa dib laguugu soo diri karaa Talyaaniga maxaa yeelay waa wadanka masuulka ka ah go'aanka codsigaaga ilaalinta caalamiga ah, (Xeer II ee Dublin).

## XUQUUQDAADA XARUNTA MAGAN GALYO DOONKA

Sidda uu sheegayo sharciga Talyaanigu:
- ❑ **Waxaad xaq u leedahay** qiimayn caafimaad iyo daryeel degdega ah ee caafimaadka
- ❑ **Waxaad xaq u leedahay** jiif ka gaar ah raga iyo dumarka iyo la jiifisga qaraabadaada.
- ❑ **Waxaad xaq u leedahay** inay ku soo booqdaan:
  - Wakiilada UNHCR,
  - Garyaqaanka,
  - Masuuliyiinta kormeerka qaxootiga,
  - Eheladaada ama muwaadiniinta Talyaaniga, marka ay codsadaan ama ogolaansho uu siiyo horjooguhu.

Intaa waxaa dheer:
- ❑ Haddii aad ku qanacsan tahay hawl wadeenka kasta oo jinsigaaga oo kale ah, waxaa laga yaabaa in laguu ogolaado shaqaalaha jinsigaaga. Waxaa, intaa dheer, oo kuu haboon inaad hawl wadeenadda u sheegto haddii aad door bidayso inaad waraysiga aad ku qaado Guddida horteeda iyaddoo ay joogaan dad jinsigaaga ah;
- ❑ Waxaa laga yaabaa inaad hawlwadeenada dookhaaga ku sahabsan nafaqada iyo baahida gaarka ah, tusaale ahaan kuwa ku sahabsan diinta.

SOMALO

**<u>HADDII NAFTAADA KU SUGNAATO XAALADO GAAR AH</u>**

Tusaale ahaan,

- haddii aad uur leedahay,
- haddii dhibaato jidheed aad qabto,
- haddii ay jirto da' wayni,
- haddii xanuun yimaad,
- haddii aad marto waxyeelo jidheed ama nafsiyeed,
- haddii aad ahayd dhibane jidh dil ama macaamil xumo,
- haddii aad la il darnaato waxyeel galmo,

Waxaa laga yaabaa inaad hawl wadeenadda xarunta ogaysiiso si ay u helaan taageero haboon. Ha ka waaban inaad sheegto waayo aragnimada ugu badan iyo waayo aragnimadda ugu xanuunka badan.

**<u>HADDII AAD TAHAY ILMO YAR OO AAN LOO SOO RAACIN TALYAANIGA</u>:**

- ❑ Waydii hawl wadeenadda xarunta inaad ka yar tahay 18 jir, maxaa yeelay, sharciyan, ilmo yar ahaan xarunta ma joogi kartid, waxaanad xaq u leedahay in lagugu martigaliyo goob ku haboon da'daada;
- ❑ Si laguu ilaaliyo, ilaaliye ayaa laguu magacaabi doonaa; taa macnaheedu waxa weeyi, qof ku caawin doona joogitaankaaga Talyaaniga (tusaale ahaan, kaa caawinaya dokumentiyada loo baahan yahay inta lagu gudo jiro codsiga magan galyo doonka, kaas oo ku caawinaya inta waraysiga lagu jiro). Ilaaliyuhu wuxuu masuul ka yahay xaqiijinta codsigaaga magan galyo doonka iyo arrimo kale;
- ❑ Waxaa muhiim ah in aad baafiso ehelkaaga. Xusuusnow in badbaadsanaantaada iyo tan qoyskaaga awgeed, qofna in aanu macluumaadka meesha qaraabadaadu ku sugan tahay u sheegayn masuuliyiinta wadankaagii iyo dadka kale;
- ❑ Waxaad xaq u leedahay inaad dugsi dhigato;
- ❑ si da'daada loo xaqiijiyo, marka aad ogoshahay oo kaliya, waxaa laga yaabaa ina lagugu baadho ekasray  gaar ah ( ekasrayda curcurka), ama baadhitaano kale oo xarunta ah ama cisbitaalka kuugu dhow. Haddii da'da lagu siiyay aanay u dhigmin ta runta ah, kala hadal hawl wadeenadda.

Mushkilkad kasta oo kale, kala hadal hawl wadeenka.

## XUQUUQDAADA ILAALO DOON CAALAMI AHAAN

- Marka aad hesho ogolaanshaha joogista, waxaad xaq u leedahay taageero caafimaad oo imanaysa kadib iska diiwaangalinta Hay'adda Caafimaadka Qaranka
- Marka ay noqoto hawlaha shaqada, haddii go'aanka magan galyo doonku aanay meel marin gudidu muddo lix bilood ah gudahood marka baaqa la soo gudhiyo oo dib u dhacaasi aanad eediisa adigu lahayn, ogolaanshaha joogitaanka waxaa la cusboonaysiinayaa muddo lix bilood ah waxaana laguu ogolaanayaa qabashadda hawlo ilaa dhamaadka

hawsha aqoonsiga. Ogolaanshaha joogista, si kastaba ha ahaaee, looma roggi karo ogolaansho Joogis sababo shaqo awgood.
- Intaa waxaa dheer in aanad codsan dib ula midow qoys.

## GO'AANADDA LAGA YAABO IN GUDDIDA XUDUUDU GAADHO (WAJIGA III)

Guddidu, waxay go'aan qoraal:
1. **ahaan kuu aqoonsan kara qaxootinimo**;
2. **kuugu diidi karaan inay kuu aqoonsadaan qaxootinimo waxaanay ku siin karaan ilaalin kab ah ,** haddii ay tixgeliso inay jirto khatar waxyeelo dhab ah haddii aad ku noqoto wadankaaga hooyo;
3. **waxay kuu diidi karaan qaxootinimadda**, laakin waxay tixgalinayaa inay jirto sababo dhab ah oo aadminimo taas oo ay booliiska ka codsan karaan inay ku siiyaan ogolaansho joogis **sababo la xidhiidho bani aadminimadda:**
4. **kuugu diidi karaan qaxootinimada waxaanay diidi karaan codsiga**.
5. **kuugu diidi karaan codsiga sal la'aan cad awgeed,** marka ay tixgeliso inay cadahay maqnaanshaha shuruudihii aqoonsiga ilaalinta caalamiga ah, ama marka aad codsi dhiibto adigoo ula jeeda inaad jiitan galiso fulinta go'aanka mustaafurinta ama diidmada. Marka xaalku sidan yahay, ka wareegida go'aanka Guddidu, ma laali doono saamaynta go'aanka lagu dhawaaqay. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaad maxkamada ka codsato laalista marka ay jiraan sababo cad, maxkamaduna waxay go'aamin doontaa shanta maalmood ee xiga.

## HADDII QAXOOTINIMO LAGUU AQOONSADO

SOMALO

Guddida waxay bilaabaysaa tallaabadda sharciga ah ee kuu ogolaanaysa inaad booliiska ka hesho ogolaanshahaaga joogista magan galyo.
Ogolaanshaha joogistu ee magan galyo doonku waa muddo 5 sanno ah waxaana dib loo cusboonaysiin karaa mar kasta oo ay dhacdo.

### XUQUUQDA QAXOOTIGA:

❑ Helista shaqo;
❑ Xuquuqda dib ula midowga qoyska
❑ Xuquuqda taageeradda dadwaynaha
❑ Xuquuqda in lagu siiyo dokumenti aad ku socdaasho
Codsiga dokumentiga socdaalka waa in la keenaa xarumaha booliiska, adigoo soo gudbinaya dokumentiyadan:
- Foomka codsiga dokumentiga socdaalka
- 2 sawir oo nooca baasaaboorka ah

- 1 tigidhka dakhliga
- Tigidhka maamulka ee isticmaalka baasaaboorka
- Koobi ogolaanshaha ansaxa ah ee joogista

❑ Xuquuqda waxbarashada dadwaynaha;
❑ Xuquuqda si xor ah u dhex marista waddamada Midowga Yurub (marka laga reebo Denmark iyo Ingiriiska), fiise la'aan, muddo aan ka badnayn saddex bilood;
❑ Xuquuqda codsashada dhalasho Talyaani ah 5 sanno kadib marka aad deganaato Talyaaniga;
❑ Xuquuqda guursashada ( cadaynta waxaa kuu samaynaysa UNHCR);
❑ Xuquuqda ka qaybqaadashada hawlaha siinta guryaha dawladda;
❑ Xuquuqda siinta liisan darawalnimo.

Wixii faahfaahin ah ee macluumaad iyo taageero ah, la xidhiidh ururadda ka shaqaynaya ilaalinta qaxootiga iyo magan galyo doonka ee meesha aad joogto.

## HADDII LAGU SIIYEY ILAALIN KABIS AH

Waa lagu ogaysiin doonaa go'aanka Guddida waxaanad ka qaadan doontaa ogolaanshahaag joogista ee ilaalinta kabista ah xarumaha Booliiska.
Ogolaanshaha joogista ee ilaalinta kabista ahi muddadeedu waxay weeyi 3 sanno waana la cusboonaysiin karaa mar kasta oo ay dhacdo kadib marka Guddidu dib u qiimayso kiiskaaga, mararka qaar dacwad la'aan.
Ogolaanshaha joogista ee ilaalinta kabista ah waxaa loo rogi karaa ogolaansho joogis sababo la xidhiidha shaqada awgeed. Tani, waa haddiiba aad leedahay kaadhka aqoonsiga – baasaaboor ama dokumentiga socdaalka – ( waydii ururda ka shaqaynaya ilaalinta xuquuqda muhaajiriinta si loo samaynayo **ka hore dhicista ogolaanshaha rasmiga ah ee joogitaanka**) **.**

**XUQUUQDA DADKA LA SIIYAY OGOLAANSHO JOOGIS EE ILAALIN KABIS AH:**

❑ Helista shaqo (muddo aan ka badnayn mudda ogolaanshaha joogista);
❑ Xuquuqda taageeradda dadwaynaha;
❑ Xuquuqda dib ula midowga qoyska;
❑ Xuquuqda taageeradda bulsho iyo nadaafada;
❑ U samaynta dokumenti socdaal dadka ajaanibka ah, haddii aanad laha baasaaboor;
❑ Xuquuqda ka qaybqaadashada hawlaha siinta guryaha dawladda.

Wixii faahfaahin ah ee macluumaad iyo taageero ah, la xidhiidh ururadda ka shaqaynaya ilaalinta qaxootiga iyo magan galyo doonka ee meesha aad joogto.

SOMALO

## HADDII AAD TAHAY QOF HAYSTA OGOLAASHO JOOGIS SABABO LA XIDHIIDHA BANI-AADMINMADA AWGOOD.

Waa lagu ogaysiin doonaa go'aanka Guddida waxaanad ka qaadan doontaa ogolaanshahaag joogista ee la xidhiidha sababo bani-aadminimo xarumaha Booliiska.
Ogolaanshaha joogista sababaha la xidhiidha bani-aadminimada muddadiisu waa 1 sanno oo haddii aad haysato baasaaboor, waxaa loo roggi karaa ogolaansho joogis shaqo.

**XUQUUQAHA DADKA LA SIIYO OGOLAANSHO JOOGIS SABABO LA XIDHIIDHA BANI-AADMINIMO AWGOOD:**
- ❑ Waxaad ka shaqayn kartaa Talyaaniga gudihiisa;
- ❑ Waxaad heli kartaa taageero caafimaad;
- ❑ codsan kartaa dokumenti socdaal oo ajaanibka ah, waa haddii aanad lahayn baasaaboor.

Wixii faahfaahin ah ee macluumaad iyo taageero ah, la xidhiidh ururadda ka shaqaynaya ilaalinta qaxootiga iyo magan galyo doonka ee meesha aad joogto.

## U WAREEGIDA AMBIIL QAADASHADA (WAJIGA IV)

Waxaa laga yaabaa inaad ambiil ka qaadato maxkamadda muddo 30 maalmood ah gudahooda marka laguu soo sheego go'aanka Guddida Xuduudaha.
Haddii lagugu hayo xarun Dawladeed oo magan galyo doonka loogu talo galay (CARA), ama *Centro Identificazione ed Espulsione* –Xarunta Aqoonsiga iyo Mustaafurinta (CIE),waxaad xaq u leedahay inaad maxkamada ku fayl garayso ambiil muddo 15 maalmood ah gudahood maalinta go'aanka laguu soo sheego (maaha 30).

**Soo gudbinta ambiilku waxay laalaysaa go'aanka Guddida markasta:**
a) oo laguu ogolaaday inaa joogto waqtiga dhiibista codsiga;
b) oo lagu galiyey xarun martigalin dawladeed (CARA) maxaa yeelay waxaa lagama maarmaan ahayd in la hubsado aqoonsigaaga ama dhalashadaada;

<u>Tan macnaheedu waxaa weeyi inaad xaq u leedahay inaad sharci ahaan baaqi ku sii ahaato Talyaaniga adigoo haysta ogolaansho joogis si aad u codsato magan galyo muddo saddex bilood ah oo sugis go'aanka maxkamadda ah.</u>.

**OGOW**
**Fayl garaynta ambiilku ma laalayso saamaynta talaabada sharciga ah ee kiisaskan soo socda**:
- Talaabada sharci ee Guddidu ka qaadatay codsigaaga ilaalinta caalamiga ahi yahay madnuuc;

SOMALO

- talaabada sharci ee gudidu aqoonsatay ilaalintaada kabista ah ;
- go'aanka Guddida la gaadhay kadib markii aad si cudur daar la'aan ah aad uga baxday xarunta dawlada (CARA)
- haddii go'aan la gaadhay si loo diido codsigaaga sal la'aan cad awgeed;
- haddii aad soo gudbisay ambiilka kadib markii lagu galiyey xarun dawladeed (CARA) sababtoo ah waxaa lagaa joojiyey inaad iska ilaaliso ama isku daydo inaad iska ilaaliso kaantaroolka xuduudaha ama wax yar kadib ama sababtoo ah waxaa lagaa joojiyey joogis aan la ogalayn;
- lagugu hayo CIE.

Tan macnaheedu waxay weeyi in kiisaska taxan, <u>marka laga reebo kiiska marka ilaalintaada kabista ah la aqoonsaday, xaq uma lihid inaad baaqi ku sii ahaato wadanka Talyaaniga gudihiida waxaana laga yaabaa in lagugu celiyo wadankaagii hooyo</u>; si kastaba ha ahaatee waxaa laga yaabaa inaad maxkamada ka codsato inay laasho talaabada sharci haddii ay jiraan waxyaabo dhab ah oo la sugay.

Sharcigu wuxuu sheegay inaad raadsato taageero garyaqaan. Haddii aanad awoodin inaad bixiso lacagta gar yaqaanka, waxaa laga yaabaa inaad codsi taageero sharci oo bilaash ah gudbisto ( kaas oo ay maalgalinayso Dawladdu).

Wixii faahfaahin ah ee macluumaad iyo taageero ah, la xidhiidh ururadda ka shaqaynaya ilaalinta qaxootiga iyo magan galyo doonka ee meesha aad joogto.

**OGOW:**
**Haddii go'aanka maxkamadda aad u tixgeliso mid aan cadaalad ahayn,** waxaa laga yaabaa inaad codsi ka fayl garayso Maxkamada Ambiillada oo aad codsato, marka ay jiraan sababo dhab ah oo sugan, ogolaansho inaad sii joogta wadanka Talyaaniga.

SOMALO

**Waxaa laga yaabaa inaad Maxkamadda Sare <u>ambiil</u> uga qaadan karto go'aanka Maxkamada Ambiilka**

**OGOW:** Ka hor inta aanad ambiil u qaadan cadaaladda, haddii aad is leedahay si fiican looma qiimayn waxyaabihii aad gudbisay, waxaa laga yaabaa inaad codsato in dib ay u dhagaystaan isla gudidii bilowday dacwadda. Codsigu ma dhex galayo muddada ambiilka.

Wixii faahfaahinta ah ee ku aadan ambiilka, la xidhiidha ururadda ilaalinta qaxootiga ama waaxda sharciga ee muhaajiriinta ee degaanka aad ku nooshahay, ama garyaqaankaaga.

## BURRINTA IYO JOOJINTA ILAALINTA CAALAMIGA AH

### 1) QAXOOTINIMADDA

Qaxootinimadda lagu siiyay waxaa la waayi karaa marka:
a) adigu mar kale si tabaruc ah naftaada ugu garatya ilaalinta wadankaagii hooyo ( tusaale ahaan, haddii aad noqotay, ama haddii aad ku noqotay masuuliyiinta diblomaasiyiinta ah wadankaaga adigoo ka codsanaya kana helaya baasaaboor, iwm);
b) marka aad adigu lumiso muwaadinimada wadankaaga, adigu marka dambe hesho;
c) aad heshay dhalashadda Talyaaniga ama dhalasho kale oo aad ku naaloonayso ilaalinta wadanka aad ka heshay dhalashadda;
d) aad si tabaruc ah adigu dib ugu wax uga bilowday wadankaagii;
e) duruufaha go'aamiyey aqoonsiga qaxootinimadaadu ay is badaleen oo aad si nabad ah u noqon karto, si aad uga faa'iidaysato ilaalinta wadankaaga;
f) aad tahay shaqsi bilaa wadan ah, oo duruufaha imika la go'aamiyey ay kuu ogolaanayaan inaad ku noqoto wadankii aad sida caadiga ah u daganayd, taas oo ay keentay isbedel ku yimid duruufihii qaxootinimada laguugu aqoonsaday.

Si ay u dhacaan waxyaabaha qodobada e) iyo f), isbadalka duruuftu waa in aanu ahayn mid ku meelgaadh ah oo isla markaana uu meesha ka saaro sababihii asalka u ahaa cabsida cadaadiska.
Intaa waxaad dheer, waa in aanay jirin sababo bani-aadminimo oo daran kuwaas oo kuu diidaya ku noqoshadaada wadankaagii hooyo.
Waayinta qaxootinimada waxaa ku dhawaaqi doona Guddida Qaranka ee Xuquuqda Magangalyadda, taas oo ku salaysan qiimaynta shaqsi ee xaaladaada gaarka ah.
Guddida Qaranka ayaa ku qoraal kugu ogaysiin doonta bilowga talaabadda joojinta iyo sababah asalka u ah, si laguu siiyo suurtagalnimada in lagu siiyo cadayn qoraal ah iyo wax kasta oo kale oo qiimaynta aad u tixgalinayso inay faa'iido u leedahay, waxaana kadib lagugu casuumi doonaa inaad waraysi gaar ah ku sharaxdo.

SOMALO

Qaxootinimadaada waa la burin karaa marka, kadib aqoonsigeeda, la hubsaddo in tan la aqoonsaday iyaddoo lagu salaynayo xaqiiqooyinka iyo/ama duruufaha sida qaldan loo soo gudbiyey, ama ka saarisata xaqiiqooyinka kale iyo/ama duruufaha, ama iyaddo lagu salaynayo dokumentiyo mar dambe la ogaaday inay been abuur yihiin.
Qaxootinimadda, waxaa kale, oo lagu burin karaa marka, kadib marka la aqoonsday, la cadeeyo inay jiraan sababo qaxootinimada loo diido karo waliba gaar ahaan:
a) ay jiraan sababo ka reebis oo uu ogol yaahy Heshiiskii Geneva ( samaynta fal dambiyeed dhan ka ah aadminimada, dhan ka ah nabbada ama dambi dagaalm ama ogaanshaha inaad mar hore ku naaloonaysay ilaalinta ama taageerad hay'add ka duwan U.N.H.C.R.)
b) ay jiraan sababo asal ah oo ay tahay in la tixgeliyo kuwaas khatar ku noqon kara amniga Qaranka Talyaaniga;

c) la xaqiijiyo duruufaha kuwaas oo aad khatar ugu noqon karto amarka iyo amniga dawladda, xukun cad laguugu cambeerayay xadgudubyadda ku cad qodobadda 407, cutubka 2, farqadda a) ee xeerka dambiilaha..

Burinta qaxootinimaddu waxaa sidoo kale ku dhawaaqi doona Guddida Qaranka ee Xuquuqda Mangan galyadd, taas oo ku salaysan qiimaynta xaaaladda gaarka ah ee shaqsiga. Guddida Qaranku waxay qoraal kugu ogaysiin doonta bilowga hanaanka burinta iyo sababaha bud-dhiga u ah si laguu siiyo suurtagalnimada in lagu siiyo cadayn qoraal ah iyo wax kasta oo kale oo qiimaynta aad u tixgalinayso inay faa'iido u leedahay, waxaana kadib lagugu casuumi doonaa inaad waraysi gaar ah ku sharaxdo.

**2) XAALADDA ILAALINTA KABISTA AH**

Ilaalinta kabista ahi ee lagu siiayay waxaa la waayi karaa marka xaaladaha keenay aqoonsigu ay meesha ka baxaan ama ay is badalaaan taas oo ilaalintii aanay daruuri ahayn. Isbadalkan ku yimid duruufaha waa inuu ahaadaa mid muhiim ah oo aan ahayn ku meelgaadh taas oo laguu tixgelin karo in aanad mar dambe u baylahsanayn halista ah '*serious danger*' marka aad ku noqoto wadankaagii, waana in aanu jirin sababo kale oo dhab ah oo bani-aadminimo kuwaas oo kuu diidaya inaad noqoto.

Joojinta ilaalinta kabista ahi waxaa ku dhawaaqi doonta Guddida Qaranka ee Xuquuqda Magan galyada, taas oo ku salaysan xaaladaada shaqsiga ah iyo meeqaankaaga '*serious danger*' ee cabsidii la aqoonsaday.

Guddida Qaranku waxay qoraal kugu ogaysiin doonta bilowga hanaanka burinta iyo sababaha bud-dhiga u ah si laguu siiyo suurtagalnimada in lagu siiyo cadayn qoraal ah iyo wax kasta oo kale oo qiimaynta aad u tixgalinayso inay faa'iido u leedahay, waxaana kadib lagugu casuumi doonaa inaad waraysi gaar ah ku sharaxdo.

Ilaalinta kabista ah waa la burin karaa marka, kadib aqoonsigeeda, la hubsaddo in tan la aqoonsaday iyaddoo lagu salaynayo xaqiiqooyinka iyo/ama duruufaha sida qaldan loo soo gudbiyey, ama ka saarisata xaqiiqooyinka kale iyo/ama duruufaha, ama iyaddo lagu salaynayo dokumentiyo mar dambe la ogaaday inay been abuur yihiin.

Ilaalinta kabista ah, waxaa kale, oo lagu burin karaa marka, kadib marka la aqoonsday, la cadeeyo inay jiraan sababo qaxootinimada loo diido karo waliba gaar ahaan:

a) ay jiraan sababo ka reebis oo uu ogol yaahy Heshiiskii Geneva ( samaynta fal dambiyeed dhan ka ah aadminimada, dhan ka ah nabbada ama dambi dagaalm ama ogaanshaha inaad mar hore ku naaloonaysay ilaalinta ama taageerad hay'add ka duwan U.N.H.C.R.);

b) Haddii la cadeeyo inaad samaysay, ama aad bilowday inaad samayso dambi daran, gudaha Qaranka Talyaaniga ama Dibadiisa. Miisaanka dambiga waxaa la qiimaynayaa iyaddoo lagu xisaabtamayo ciqaabta, oo aan ka yaran afar sanno ama aan ka badnayn toban sano, ee uu ogol yahay sharciga Talyaaniga ee dambigu;

SOMALO

c) la xaqiijiyey duruufaha aad khatar ugu noqon karto amarka iyo amniga dawladda.
Burinta ilaalinta kabista ah waxaa sidoo kale ku dhawaaqi doona Guddida Qaranka ee Xuquuqda Mangan galyaddo, taas oo ku salaysan qiimaynta xaaaladda gaarka ah ee shaqsiga.
Guddida Qaranku waxay qoraal kugu ogaysiin doonta bilowga hanaanka burinta iyo sababaha bud-dhiga u ah si laguu siiyo suurtagalnimada in lagu siiyo cadayn qoraal ah iyo wax kasta oo kale oo qiimaynta aad u tixgalinayso inay faa'iido u leedahay, waxaana kadib lagugu casuumi doonaa inaad waraysi gaar ah ku sharaxdo.

## KU NOQOSHADDA WADANKAAGII EE TABARUCA AH

Noqoshadda wadankaagii si sharaf leh oo badqabta waa xuquuq aad leedahay.
Haddii aad tahay ilaalo doon caalami ah, **hadddi lagu diiday balse 30 maalmooda aanay ka soo wareegin markii lagu soo ogaysiiyay diidmadda**, haddii la aqoonsaday xaaladaada qaxootinimo, haddii la aqoonsaday ilaalintaada kabista ah ama haddii aad haysato ogolaansho joogis sababo la xidhiidha bani-aadminimada waxaa laga yaabaa inaad si tabaruc u go'aansato inaad ugu noqoto wadankaagii.
Barnaamijka ku noqoshadda tabaruca ah ee  la taageero wuxuu ku siinayaa: adeeg la talin ah, macluumaad casriysan oo ku sahabsan wadankaagii, taageero helista dokumentiyada socdaalka ee masuuliyiinta qunsiliyadda, diyaargarowga socdaalka, iyo kharashaadka kuga baxay ilaa inta la gaadhayo bar tilmaameedka, iyo qodobo kharashaadka hordhaca ah iyo dib u dhexgalka ah.
Xasuusnow in aand heli karin barnaamijka celinta tabaruca ah haddii ay kuu socoto talaabo mustaafirin ah.
Waa xuquuq aad leedahay inaad xog ka hayso suurtagalnimada noqosho tabaruc ah, waxaana laga yaabaa inaad la xidhiidho:
hawl wadeenada xarunta.

SOMALO

# Macnaha Ereyadda

**WASAARADDA ARIMAHA GUDAHA**: Waa qaybta Maamulka Dawladda Dhexe ee masuuliyadeeda koowaad tahay socdaalka iyo arimaha magangalyadda.

**GOBOLKA**: waa qaybta Maamulka Wasaaraada Arimaha Gudaha ee gobolka waana Xafiis Goboleedka dawladda.

**WAAXDA BOOLIISKA**: waa qaybta maamulka ee hagta isla markaana agaasinta hawlaha booliiska gobolka. Waax kasta oo Booliis, gudaheeda waxaa ku yaala xafiisa arimo dibadeed kaas oo masuul ka ah habka socdaalka muhaajiriinta iyo dadka magangalyo doona ah (tusaale ahaan waxaa laga yaabaa inuu xafiiskani qabto codsiyda magangalyo doonka, uu sameeyo ama dib u cusboonaysiiyo ogolaanshaha joogista iyo dokumentiyadda socdaalka)

**GUDDIDA QARANKA EE XUQUUQDA MAGANGALYADA:** hawsheedu waa hagista iyo isku-duwida Guddida Xuduuda, tabobarida iyo warsiinta xubnaha isla guddidda iyo ururinta xogta tirikoobka. Waxay leedahay awood go'aan-gaadhis oo ay ku burinayso kuna joojinayso meeqaanka la siiyo cid.

**GUDDIDA XUDUUDKA EE AQOONSIGA ILAALINTA CAALAMIGA AH:** they have the task of evaluating the request for recognition of the status of international protection. Set at a maximum of ten, they are hawshoodu waxay tahay qiimaynta codsiga aqoonsiga meeqaanka ilaalinta caalamiga ah. Ugu badnaan waa toban, iyagu waa:
- GORIZIA: xukuma codsiyada la keenay gobollada Friuli-Venezia Giulia, Veneto, Trentino Alto Adige;
- MILAN: xukuma codsiyada la keenay gobollada Lombardy;
- ROME: xukuma codsiyada la keenay gobollada Lazio, Abruzzo, Sardegna, Toscana, Marche, Umbria;
- FOGGIA: xukuma codsiyada la keenay gobollada Foggia and Barletta-Andria-Trani;
- SIRACUSA: xukuma codsiyada la keenay gobollada Siracusa, Ragusa, Caltanissetta, Catania;
- CROTONE: xukuma codsiyada la keenay gobollada Calabria iyo Basilicata;
- TRAPANI: xukuma codsiyada la keenay gobollada Agrigento, Trapani, Palermo, Messina, Enna;
- BARI: xukuma codsiyada la keenay gobollada Bari, Brindisi, Lecce and Taranto;
- CASERTA: xukuma codsiyada la keenay gobollada Campania iyo Molise;
- TURIN: xukuma codsiyada la keenay gobollada Valle d'Aosta, Piemonte, Liguria, Emilia Romagna.

**XARUNTA MARTIGALINTA MAGANGALYO-DOONKA (CARA)**: halkani waa lagu martigaliyo ajaanibka raadinaya ilaalin caalami ah inta ay ku jiraan hawsha codsashada ilaalinta caalamiga ah:
Codsadaha waxaa lagu haynayaa xarunta martigalinta magangalyo doonka (CARA) xaaladahan soo socda:
a) marka ay lagama maarmaan tahay in la cadeeyo ama go'aan laga gaadho dhalashadiisa ama dhalashadeeda, marka aanu ama aanay sidan dokumentis socdaal ama aqoonsi, ama marka, la yimaad xuduudka wadanka, marka isagu ama iyadu keentay dokumentiyo beern abuur ah;
b) marka la dhiibayo codsiga kadib markii lagaa ilaaliyey ama la isku dayayo in lagaa ilaaliyo kaantaroolka xuduuda, waxyar kadib;
c) marka la keenayo codsiga kadib markii la ogaadhayo xaalada joogis aan la ogalayn.
Marka arrintu tahay sida qodobka a), codsadaha waxaa lagu haynayaa xarunta muddo aan ka badnayn labaatan maalmood. Kiisaska kale codsadaha waxaa lagu haynayaa xarunta waqtiga lama huraanka u ah baadhista codsiga ee guddid xuduuda kiis walbana muddo aan ka badnayn shan iyo soddon maalmood.

**URURADDA ILAALINTA QAXOOTIYADDA**: Ururadda masuulka ka ah ilaalinta sharci iyo maamul ee qaxootiga iyo magangalyo doonka. Si aad ula xidhiidho ururadan, waxaad eegtaa bogga ay ku qoran yihiin ciwaandda faa'idda lehi ama la fadlan la xidhiidh hawl wadeenka xarunta haddii aad xarun ku jirto.

**SISTAMKA ILAALINTA MAGANGALYO DOONKA IYO QAXOOTIGA (SPRAR):** SPRAR waa sistam ah martigalin iyo isdhexgal, kaas oo ay martigaliso Wasaaradda Arimaha Guduhu iyo hay'addaha Maxalliga ah ee magangalyo-doonka iyo qaxootiga siiya taageero guryaha iyo taageero bilowga nidaamka dhexgalka wadankaa.

**HAWLWADEENADDA XARUNTA:** Kuwani waad dad gaar ah oo ku sugan gudaha xarunta martigalinta (CARA) kana masuul ah dhinaca maamulka/ururka ee adeegyada la fidiyo si loo ilaaliyo ilaalo doonka caalamiga ah isla markaana loo xaliyo dhibaatooyinkooda caafimaad, nafsi iyo sharci ee dadkan codsanayo ilaalin caalami ah.

**DHEXDHEXAADIYAASHA LUUQADDA IYO DHAQANKA**: waa dad xarunta ku sugan kuwaas oo ilaalo doonka caalamiga ah ka caawiya la xidhiidha shaqaalaha xarunta ama/iyo xubnaha guddida xuduuda, xataa waxay sharaxaan kala duwanaanshaha hab-dhaqanka iyo dhaqanka.

**OGOLAANSHA JOOGISTA**: kani waa dokumentiga kuu ogolaanaya inaad sifo sharci ah ku joogto wadanka Talyaaniga.

**DOKUMENTIGA SOCDAALKA**: kani waa dokumentiga kuu ogolaanay inaad ka baxdo Talyaaniga haddii laguu aqoonsado qaxooti.

**OGOLAANSHAHA SOCDAALKA**: kani waa dokumentiga kuu ogolaanaya inaad u socdaasho meel ka baxsan Talyaaniga haddii aad hesho ogolaanshaha joogista ee ilaalinta kabista ah iyo ilaalinta bani-aadminimada.

## **Sharciyadda la tixraacayo**:

- **Heer Caalami:**
  - Heshiiskii Geneva ee 1951-kii ee aqoonsashada qaxootinimada.

- Midowga Yurub:
  - Xeerka lambarkiisu yahay 343/2003 kaas oo sheegaya shuruudaha iyo habka go'aan ka gaadhista waddamada kartida u leh lafo-gurka codsiyadda magan galyo-doonka ee waddamada xubinta ka ah ee muwaadin wadan saddexaad.

- **Heer Qaran**
  - Digreetaddii sharci ee December 30, 1989, lambarkeedu ahaa 416 ( Xeerka degdega ah ee arimaha magangalyo doonka siyaasadeed, soo galista iyo joogista muwaadiniinta iyo dadka aan wadan lahayn ee hore u joogay Talyaaniga), la rogay, isbedel lagu sameeyay sharcigii febraayo 28, 1990 , ee lambariisku ahaa 39, sida uu badalay sharciga lambarkiisu yahay  189/2002;
  - Digreetaddii Madaxwaynaha Jamhuuriyada ee September 16, 2004, lambarkiisu ahaa 303, xeer ku sahabsan nidaamka aqoonsiga qaxootinimada ;
  - Digreetadda sharci ee May 30, 2005, lambarkeedu ahaa 140, fulinta qaraarka 2003/9/CE kaas oo sheegaya shuruudaha ugu yar ee gudoomidda dadka magangalyo doonka ah ee Waddamada Xubanaha ah;
  - Digreetaddii July 25, 1998, lambarkeedu ahaa 286, Qoraalka socdaalka.
  - Digreetaddii sharci ee January 28, 2008, ee lambarkeedu ahaa 25 iyo Digreetaddii October 3, 2008, lambarkiisu  yahay 159 ee fulinta qaraarka golaha 2005\85\CE ee December 1, kaas oo ku sahabsan xeerka la adeegsaday ee Wadamadda Xubanaha ah ee sababteedu tahay aqoonsiga iyo burinta qaxootinimadda.
  - Digreetadii sharci ee November 19, 2007, lambarkeedu ahaa 251 ee fulinta qaraarka golaha 2004\83\CE ee April 29, 2004 kuna sahabsanaa sharciga ugu yar ee siinta muwaadiniinta wadan saddexaad ama dadka aan wadanka lahayn qaxootinimo ama dadka u baahan ilaalinta caalamiga ah, iyo siddoo kale sharciyada muhiimadda ilaalinta la aqoonsaday.

SOMALO

# Ciwaano faa'iido badan leh

**WASAARADDA ARIMAHA GUDAHA: www.interno.it**
Tanni waa mareegta (website) Wasaaradda Arimaha Gudaha, qaybta magangalyo donta, taas oo ku siinayso warara iyo tixraacayo ku sahabsan mawduucyada codsiga iyo aqoonsiga ilaalinta caalamiga ah.

**BOOLIISKA GOBOLKA: www.poliziadistato.it**
Tanni waa mareegta Booliiska Gobolka ka masuulka ah bixinta xogta marka aad soo gaadho xuduuda xarumaha booliiska iyo xafiisyada, qaybaha iyo adeegyadda muwaadinka.

**ADEEGA XARUNTA: www.serviziocentrale.it**
Tani waa mareegta aad ka helayso macluumaadka faa'iidada leh ee martigalinta qaranka iyo sistamka is dhexgalka (SPRAR), kaas oo ay maalgaliso Wasaaradda Arimaha Gudaha iyo Hay'addaha maxalliga ahi.

**Heer Caalami**

**UNHCR – United Nations High Commission for Refugees**
**ACNUR – Alto Commissariato delle Nazioni Unite per i Rifugiati**
Address: via Alberto Caroncini, 19 – 00197 Rome
Telephone: 06 802121
Fax: 06 80212324
E-mail: itaro@unhcr.org

**OIM – Organizzazione internazionale per Migrazioni**
**IOM – International Organization for Migration**
Address: via Nomentana, 62 – 00161 Rome
Telephone: 06 44231428
Fax: 06 4402533
E-mail: MRFRome@iom.int

**National**

**CIR (Consiglio Italiano per i Rifugiati)**
Address: via of the Velabro 5/A – 00186 Rome
Telephone: 06 69200114

SOMALO

Fax: 06 69200116
E-mail: cir@cir-onlus.org

**ARCI Nuova Associazione**
**Toll-free protection number: 800 905 570**
Lambar bilaash kaas oo laga yaabo inaad wacdo si aad u hesho akhbaar iyo taageero haddii aad u baahan tahay inaad codsato magangalyo, haddii aad codsatay magan galyo, haddii aad tahay qaxooti ama haddii lagu siiyay ogolaanshaha joogista sababo bani-aad-minimo awgeed.
Address: via dei Monti di Pietralata, 16 - 00157 Rome
Fax : 06 41609234
E-mail: itri@arci.it; nahum@arci.it

**CARITAS**
Address: via delle Zoccolette, 19 - 00183 Rome
Telephone: 06 6861554 – 06 6875228
Fax: 06 6833295
E-mail: area.immigrati@caritasroma.it

**ICS - Ufficio rifugiati di Trieste**
Address: via Roma, 28 34170 - TRIESTE
Telephone: 040 3476377
Fax: 040 3487592
E-mail: icstrieste@yahoo.it

**ASGI - Associazione Studi Giuridici on Immigrazione**
Address: via Gerdill, 7 - 10100 Turin
Fax: 011. 4369158
E-mail: segreteria@asgi.it

or

Address: via Aquileia, 22 - 33100 Udine
Fax: 0432.507115
E-mail: info@asgi.it